# Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiinta iyo Daryeeleyaasha.

## Caawinta hadalka iyo dhegeysiga ilmahaaga

### 1. Faallooyinka halka su'aalaha

Ka hadal waxa uu ilmahaagu samaynayo
Su'aalaha tiro badani waxay u eekaan karaan imtixaan. Halkeeda, sheeg waxa dhacaya (tusaale ahaan, “Kubbadda tuur”). Waxaa siyaado loo filan karaa in uu ilmahaagu wax barto oo ay adiga kugu daydaan.

---

### 2. Ku hadal luqadda gurigaaga

Isticmaal luqadda ugu muhiimsan ee qoyskaaga
Carruurtu waxay sida ugu fiican wax ugu bartaan luqadda aad guriga kaga hadasho. Waxay af Ingiriisiga goorta dambe ku baran karaan xannaanada ama dugsiga .

---

### 3. Raac hoggaanka ilmahaaga

Kala qayb qaado waxa uu ilmahaagu jecel yahay
Waxay tani muujinaysaa in aad dantooda la wadaagto. Marka ay carruurtu xiiseeyaan waxa ay samaynayaan, siyaado ayay ugu feejignaadaan waxayna siyaado ugu faraxsan yihiin in ay wada xiriiraan ama hadlaan.

---

### 4. Ilmahaaga isku soo jeedi

Fariiso adigoo ku wajahan ilmahaaga. Magacooda sheeg ka hor inta aadan hadlin. Ka hadal waxyaabaha aad labadiinuba arki kartaan.

---

### 5. Iyaga u fududee hadalka

Mujurucyada ayaa carruurta u diidi kara barashada hadalka. Mujuruca ka saar maalinta dhexdeeda. Isku day in aad mujuruca isticmaasho waqtiyada hurdada oo keliya.

---

### 6. Iyaga waqti u sii hadalka

Carruurtu waxay u baahan yihiin waqti dheeraad ah si ay wax u fahmaan oo ay ka dib u go'aamiyaan waxa ay dhahayaan. Iyaga eeg oo sug, si ay u ogaadaan in aad dhegeysanayso.

---

**7. Iyaga u fududee dhegeysiga**

---

**8. Kolba dib u dheh**

Marar badan ku celceli ereyada muhiimka ah.
Carruurta yar yari waxay u baahan yihiin in ay marar badan maqlaan ereyo isku mid ah. Waxay tani iyaga ka caawisaa in ay fahmaan oo ay bartaan ereyo cusub.

---

**9. Isticmaal hadal fudud**

Isticmaal weedho gaagaaban oo cad
Aayar u hadal oo sheeg weedho fudud sida "Waqtigii cuntada iminka." Waxay tani ilmahaaga ka caawinaysaa in ay wax fahmaan oo ay xasuustaan.

---

**10. Ha ka walwalin haddii ay si qalad ah wax u yiraahdaan**

**Ereyada asalka ah**
Diiradda saar waxa uu ilmahaagu dhahayo, halka sida ay u dhahayaan.

Dhegeyso waxa uu ilmahaagu isku dayayo in ay sheegaan. Markaa dib ugu sheeg ereyga saxda ah. Ilmahaaga ha ku amrin in ay adiga kugu daydaan.

---

**11. Xiise wada qaata**

Ciyaara oo waqtiga wada xiiseeya
Buugaag akhriya, heeso qaada, ficillo sameeya, oo si caqli xun u dhaqma. Waxay tani carruurta ka caawisaa in ay feejignaadaan oo ay wax bartaan.

---

**12. Xulashooyin bixi**

Su'aalo weydii sida "Miyaad rabtaa moos mise tufaax?" Waxay tani carruurta ka caawisaa in ay ku tababbar qaataan sheegidda waxa ay rabaan.

---

**13. Isku tiiri waxa ay yiraahdaan**

Ereyo ku dar hadalkooda.
Haddii uu ilmahaagu dhaho "Bas," waxaad ugu jawaabi kartaa, "Haa, bas weyn."
Waxay tani iyaga ka caawinaysaa in ay ereyo dheeraad ah bartaan.